

**Magaca Musharaxa:** **Julie Kang**
**Magaca Ololaha:** **Julie oo Seattle u joogta Degmada 5aad**
**Mareegta ololaha:**
**https://julieforseattle.com/**
**Booska:** **Golaha Magaalada, Degmada 5aad**
**Lambarka Taleefanka Ololaha:**
**206.880.3873**
**Hordhaca Musharraxa (xadka 200-eray):**

Waxaan muddo dheer deganaa Degmada 5aad, ahaana macallin, iyo xubin firfircoon oo bulshada ka tirsan. Anigoo ah qof soo galooti ah oo noloshayda ka dhisay Waqooyiga Seattle, waxaan fahansanahay sida go'aamada magaaladu u qaabeeyaan xaqiiqada maalinlaha ah ee qoysaska shaqeeya, soo galootiga, iyo ganacsiyada yar yar.

Waxaan u baahanahay in hoggaamiyeyaasheenu ay dhegeystaan, oo ay fahmaan waxa degmadeenu dhab ahaan u baahan tahay. Mudnaantayda waa qiima la awoodi karo, guryo qiimo jaban, badbaadada iyo Hoy La'aan, iyo ilaalinta soo galootiga.

Noloshayda xirfadeed waxaan ku qaatay waxbarasho dadweyne iyo mid sare, anigoo tababaraya macallimiinta si ay u taageeraan ardayda luqadaha badan ku hadasha. Waxaan ka soo shaqeeyay Jaamacadda Washington iyo Jaamacadda Seattle, anigoo hoggaaminaya oo naqshadeynaya barnaamijyo ballaaran, maamulaya miisaaniyadaha dadweynaha ee adag, iyo dhisidda iskaashiyo ka dhexeeya qaybaha kala duwan oo diiradda saaraya isla xisaabtan, U sinaashaha, iyo natiijooyinka.

Waxaan ka tirsanahay guddiga Bulshada Haller Lake Club, waxaan iskaa wax u qabso uga shaqeeyaa kaydka cuntada, waxaan wax baraa bulshada soo galootiga ah waxaanan qaybiyaa qalabka foorida, waxaana hoggaamiyaa socodka FuseD5 si aan u taageero ganacsiga yar. Waxaan ahay xubin ka tirsan ururka shaqaalaha WEA oo ku faanaya, ninkayguna waa xubin ka tirsan UFCW 3000.

Waxaan Gudiga Maamulka Magaalada u keeni doonaa aqoonta bulshada, khibradda bangiyada, khibradda xeerarka iyo hoggaaminta joogtada ah. Waxaan ballan qaadayaa inaan noqdo hoggaamiyaha ay bulshadeennu u baahan tahay - qof dhegeysta oo u dooda kuwa aan codka lahayn.

Sharaf ayay ii tahay inaan taageero kaa helo oo aan matalo degmadeena.

*Musharaxani wuxuu ka qayb qaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca Musharaxa:** Silas James

**Magaca Ololaha:** Silas oo Seattle u tartamaya

**Bog-khadka ololaha:** https://silasforseattle.com/

**Jagada Magaalada:** Golaha Magaalada ee Degmada 5aad

**Lambarka Taleefanka Ololaha:** (425) 224-5463

Waxaan ahay Silas James, waxaana u tartamayaa Golaha Magaalada Seattle ee Degmada 5-aad si aan magaaladeena uga dhigo mid si fiican ugu shaqeysa qof kasta. Anigoo ah macallin leh Naafanimo, cilmi-baare, u-doode, iyo Guddoomiyaha Guddiga Naafanimada ee Seattle, waxaan ka niyad jabay nidaamyadeena khariban. Waxaa iga go'an inaan hubiyo in shirkadaha qaniga ah ay bixiyaan saamigooda saxda ah, ballaarinta guryaha la awoodi karo, iyo abuurista xalal ku salaysan bulshada si loo helo badbaadada dadweynaha iyo caddaaladda cimilada. Haddii aan Seattle ka dhigno meel u shaqeysa deriskeena ugu nugul, qof walba wuu faa'iidi doonaa.

Inta badan noloshayda waxaan isticmaalayay cawimada dadweynaha; waayo-aragnimadaas awgeed waxaan noqday khabiir ku takhasusay nidaamyadan adag. Waxaan u hagayay dadka mid mid oo kooxo ayaan baray sida loo guuleysto, laakiin hadda waa waqtigii la hagaajin lahaa nidaamyada laftooda, markaas Seattle oo dhan ayaa ka faa'iideysan doonta.

Waxaan u tartamayaa inaan dadka siiyo agabka ay u baahan yihiin si ay u guuleystaan iyo in xaafadaheenu ay amaan u ahaadaan dadka iyadoon loo eegin cidda ay yihiin, meesha ay ka yimaadeen, ama inta lacag ah ee ay haystaan.

Waxaan kaa codsanayaa inaad taageerto ololahayga adigoo Silas u qoondeynaya Foojarrada Dimuqraadiyadda Seattle. Hubi in mustaqbalka magaaladeena aan anagu leennahay, ee aysan lahayn shirkadaha bilyaneerka ah.

*Musharaxani wuxuu ka qayb qaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda*.



Magaca Musharaxa: Nilu Jenks.

Magaca Ololaha: Deriska Nilu

Bog-khadka ololaha: https://www.neighborsfornilu.org

Jagada: Golaha Magaalada, Degmada 5aad

Lambarka Taleefanka Ololaha: 206-321-9890

Waqooyiga Seattle waa meesha ay carruurteydu ku korayaan, halkaas oo derisku ay noqdeen saaxiibo nolosha oo dhan, iyo halkaas oo aan sannado badan ku qaatay ka shaqaynta xoojinta bulshadeenna. Laga bilaabo wadahadallada beerta eeyaha ilaa shirarka bulshada, waxaan jeclahay inaan la macaamilo deriska iyo inaan dhiso nooca bulshada ay dadku is ilaaliyaan. Waxaan u tartamayaa inaan u adeego Degmada 5-aad, sababtoo ah waan jeclahay meeshaan.

Waxaan ahay gabadha soogalooti Iiraani ah, u-doode bulsho, iyo hooyo shaqeysa oo laba carruur ah leh. Sannado badan ayaan la shaqeynayay deriska si aan u horumarino iskuulladeenna, u xoojino xaafadaheena, iyo inaan dhisno bulsho loo dhan yahay.

Golaha Magaalada markaan ku biiro, waxaan u dagaalami doonaa guryo la awoodi karo oo u dhow iskuulada, beeraha raaxada, iyo gaadiidka dadweynaha. Waxaan wax ka qaban doonaa farqiga helitaanka cuntada ee ka dhashay xidhitaankii dhawaan ee Goobaha raashinka iyo farmashiyaha oo nolosha maalinlaha ah uga dhigay mid adag qoysaska iyo waayeelka. Waxaa iga go'an taageeridda caddaaladda cimilada iyo waddooyinka badbaadada leh, dejinta taraafikada, iyo helitaanka dariiqyada lugeynta ee xaafadaheenna loo ballanqaaday tobanaan sano.

Shaqadaydii FairVote Washington, waxaan ka caawiyay isku keenista dadka bulshooyinka si aan u xoojiyo oo aan u ilaalino dimuqraadiyadeenna.

Ololahaan wuxuu ku shaqeeyaa deriska oo aaminsan in Degmada 5-aad ay mudan tahay hoggaan ballan leh, dhegeysta, oo wax qabta. Taasi waa waxa aan damacsanahay inaan

sameeyo.

*Musharaxani wuxuu ka qayb qaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca Musharaxa: Dimitri Georgakopoulos**

**Magaca Ololaha: U-doodid Xamaasad Leh oo loogu Talagalay Seattle Ka Wanaagsan**

**Booska: Golaha Magaalada,**

**Degmada 5aad**

**Telefoonka Olalaha: 206.409.7275**

**Hordhaca Musharraxa (xadka 200-eray):**

Anigu waxaan ahay Reer Seattle — waxaana diyaar u ahay inaan noqdo u-doodaha ugu adag ee magaalada.

Waxaan ku soo koray Montlake, waxaan wax ku bartay Garfield High School, waxaana i qaabeeyay Seattle University — magaaladan ayaa i dhistay. Ku dhawaad soddon sano ayaan ganacsade ka ahaa halkan Seattle: marka hore waxaan lahaa maqaayado Giriig ah, kadibna waxaan dhistay xirfad ahaan dillaal hanti ma-guurto ah oo shati haysta. Waxaan arkay rajadii Seattle oo wajahaysa caqabado adag, iyadoo natiijooyinkuna aysan gaarsiisnayn heerkii la filayay.

Si yaasiyiintu waxay ballanqaadaan in noloshu ay noqoto mid la awoodi karo. Seattle wali waa magaalo qaali ah oo aan si fudud loo awoodi karin in lagu noolaado. Waxay ballanqaadaan badbaado. Waxay ballanqaadaan badbaado. Hase yeeshee, Aurora wali waxaa si weyn u saameeya ka ganacsiga galmada iyo ganacsiyo dadka ka faa'iideysta. Waxay dhisaan waddooyin baaskiil, halka marinnadii ganacsigu ay sii daciifayaan, ganacsataduna ay ka maqan tahay taageeradii ay u baahnaayeen, guryaha dakhligoodu hooseeyo na lagu ururinayo Degmada 5-aad iyada oo aan la tixgelin caddaalad ama aragti fog.

Iyadoo hoggaamiyayaashu ku mashquulsan yihiin arrimo kale, khatar aamusan ayaa sii xoogeysanaysa — sirdoonka macmalka ah (AI) wuxuu meesha ka saaraya shaqooyin, wuxuuna dib u qaabeynayaa mustaqbalka dhaqaalaha iyo kobaca magaalooyinkeena.

Degmada 5-aad waa meel gaar ah oo cajiib ah — isku dhaf hodan ah oo dhaqammo kala duwan ah, muuqaallo dabiici ah oo qurux badan, iyo karti weyn oo wali aan si buuxda looga faa'iidaysan. Waxay mudan tahay hoggaamiye arka awooddaas, u dagaallama danahaas, kana dhiga ficil dhab ah.

Ma ihi siyaasi xirfaddiisu tahay siyaasadda. Waxaan ahay deriskaaga, u-doodahaaga, iyo qof xaqiiqada sida ay tahay u arka. Degmada 5-aad waxay u baahan tahay xalal dhab ah. Waxaan diyaar u ahay inaan hirgeliyo.

*Musharaxani wuxuu ka qayb qaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*